# Waa maxay Isku Xirka Qoyska-Dugsiga (Family-School Compact)?

Heshiiska Qoyska-Dugsiga Title I ee Kasbashadu waa heshiis ay waalidiinta, ardayda iyo macalimiintu soo wada saaraan. Wuxuu sharxaa sida waalidiinta iyo macalimiintu ay uga wada-shaqayn doonaan hubinta ardayda oo dhan inay helaan taageerada qof-calaa-qofka ah ee ay u baahan yihiin si ay u gaadhaan ugana saramaraan heerka waxbarashada fasalka.

Discovery waa dugsiga Title 1 Iskuulka oo Dhan ah. Hadafka barnaamij Title 1 Iskuulka oo Dhan ah waa hubinta in ardayda oo dhan, gaar ahaan ardayda liidata, muujiyaan aqoon iyo heerar sare oo kasbasho waxbarasho ah.

## Himilada Degmada 742

Oraahda Howgalkayagu waa abuurista jawi badbaado iyo daryeel iyo dhaqan kaasi oo aanu ugu diyaarino, ku hawlgalino, wax ku barno, ku xoojino, oo ku dhiirigalino dhammaan ardayda iyada oo la kaash-anayo bulshada ku hareeraysan si aan ugu guulaysano bulshada maanta iyo tan berriba.

## Yoolasha/Ahdaafta Dugsiga

**Akhriska:** Akhriska: Marka la gaadho guga 2021, boqolkiiba inta ardayda 3aad, 4aad iyo 5aad ee buuxinaya ama uga saramaraan heerka wax akhriska Minnesota waxay ka kordhi 25% ilaa 35% marka lagu cabbiro Akhriska MCA III.

**Xisaabta:** Xisaabta: Marka la gaadho guga 2021, boqolkiiba inta ardayda 3aad, 4aad iyo 5aad ee buuxinaya ama ka saramara heerka aqoonta Xisaabta Minnesota waxay ka kordhi 22% ilaa 32% marka lagu cabbiro Xisaabta MCA III.

# Taageeridda Iskaashiga

## Hawlaha lagu Taageero Iskaashiga

**Shirarka**
3:00-7:45pm
- Noofeembar 5 & 12
- Febraayo 18 & 25

**Tartanka Socodka ee Kombiyuutarka lagaga qaybqaadanayo**
- Maajo 10

**Maalinta Xirfadaha AVID**
Fasalada 3, 4 & 5
- Maarso 15-18

**Maalinta U Diyaargareynta Kulliyadda**
Fasalada K-2
- Maarso 15-18

**Koodhinka Bulshada (Community Coding)**
- Janaayo 11-12

**Xooji barashada**
(Horay in la isu sii diiwaangeliyo ayaa loo baahan yahay)
3:45-4:45pm
- Kulanka I: Diisember 10
- Kulanka II: Abriil 8

## War Isgaadhsiinta Kusaabsan Barashada

Discovery waxa ka go'an gaadhsiinta si joogto ah qoysaska loo gaarsiiyo wixii kusaabsan barashada ilmahooga. Qaar kamid ah qaababka waalidiintu filan karaan inay ku helaan war isgaadhsiinta waxaa kamid ah:

- Galalka guriga loo qaato Jimcaha ee Toddobaadlaha ah
- Warsidaha Dugsiga ee Billaha ah
- Ajendayaasha/qorshaha fasalla saddexaad, afraad iyo shanaad

## Su'aalaha?

Waalidiintu waxay la xidhiidhi karaan macalinka ilmahooga si ay u hubiyaan horumarka ardayga.

320-370-6180

www.isd742.org/discovery

700 S. Seventh St., Waite Park

# Discovery Community School

Title I

# Isku Xirka Qoyska-Dugsiga ee Guul Gaaridda ee

## Diirad Saaridda Guusha Ardayda

2020-21




St. Cloud Area School District

Becky Estrada, Maamule
becky.estrada@isd742.org
320-370-6180

# Fasalka dhexdiisa

Dugsiyada Degmada 742 waxay kala shaqeeyaan ardayda iyo qoysaska taageerista guusha ardayda ee xagga akhriska iyo xisaabta. Qaar kamid ah isku-xidhayaasha muhiimka ah ee qoysaska waxa kamid ah:

- Ilaha degmada iyo boga internetka ee dugsiga waxay taageeraan oo loolanna galiyaan wax barashada ardadya waxaana laga heli karaa www.isd742. org ama www.isd742.org/.
- Minnesota Reading Corps waxay bixiyaan taageero keli-keli ah (fool ka fool) ardayda Barbaarinta ilaa fasalka saddexaad.
- Minnesota Math Corps waxay bixiyaan taageero kooxo yar ah ardayda fasalada afraad iyo shanaad.
- ADSIS (Hab Kale ee Gudbinta Adeega Waxbarashada Gaarka ah) waxay bixiyaan taageero dheeraad ah oo kooxo yar ah dhanka akhriska iyo xisaabta.
- AVID (Advancement Via Individual Determination) waa barnaamij koolejka u diyaariya oo ka caawiya ardayda in ay dhistaan xirfadaha ay u baahanyihiin si ay guul uga gaadhaan koolejka.
- ALEKS (Goobaha Qiimaynta iyo Barashada Aqoonta) waa barnaamij aad la qabsankarto dhanka barashada oo ardayda loogu talagalay.

# Guriga

Qaadashada layliga akhriska iyo xisaabta. Waa kuwan dhawr fikradood oo taas kaa caawinaya. Qoysasku waxa dhici karta inay hayaan fikrado kale si liiska loogu daro.

- Imoow habeenada madadaalada oo ka qayb qaado howlaha iyo qorsheyaasha lagu horumarinayo waxbarashada ardayda.
- Ilmahaaga la akhri maalin kasta. PAKRAT (Parents and Kids Reading A-Lot Together) oo ah barnaamijka waalidka iyo ilmaha oo isla akhriya wax badan waxay ay bixisaa buug cusub maalinkasta oo iskuul jiro si ay ardaydu guriga ugu qaataan oo ay 20 daqiiqo u akhriyaan.
- Xisaabta ku madadaalo. Isticmaalo alaab laga helo guriga si aad u sahamiso xisaabta.
- Ku ciyaar geemka erayada eraybixinaha cusub erayadooda oo hel qaabab loogu isticmaalo erayadan wada-sheekaysiyada qoyska.
- Xog-ogaal ahaw adigoo raadinaya joornaalka dugsiga adiga oo booqonayana boga internetka ee dugsiga si joogto ah.
- Ku xirmo wixii macluumaad ah ee jira ee ku saabsan waxbarashada dhanka kombiitarka sida Symbaloo. Guji meesha ay ku qorantahay Student Connect ee bogga iskuulkaaga.
- Ku dhiiri geli oo ku taageer in teknoolojiyada loo isticmaalo dhanka waxbarashada. U isticmaal teknoolojiyada in aad kor ugu qaadaan waxbarashada iyo aqoonta ilmahaaga. Daawo baritaan khadka internetka ah si aad u barato Seesaw iyo Google Classroom.

# Soojeedimaha loogu Talogalay Guusha

Ardaydu waxa dhici karta inay doonaan isku-dayga fikradaha so socda si ay xidhiidh ugu sameeyaan ku barashada guriga iyo dugsiga:

- Kala-hadlaan qoyska erayada eray-bixinaha cusub iyo waxay ku baranayaan xisaabta.
- Guriga keenaan warsidayaasha iyo ogaysiisyada ku saabsan habeenada madadaalada qoyska.
- Ku hayaan diiwaan geemyada ay ku ciyaaraan guriga si ay ugu layliyaan erayada eray-bixinaha cusub iyo xisaabta.
- Ka faa'idayso qaar kamid ah isku xirayaasha (links) waxbarasho ee laga heli karo boga internetka ee dugsiga marka ay haystaan wakhtiga shaashadda.
- Qorsheeyaha AVID ee loogu talagay Touchpoint Learning

